ÖIF ÖSTERREICHISCHER INTEGRATIONS FONDS

# Koorsooyinka Waalidiinda Samarka ee ÖIF: Jihayn iyo Caawimaad dhanka Sistamka iskoolka ee Awstariya

„Iskuulka Samarka“ ee Wasaaradda Waxbarashada markii ugu horaysay 2020 kii samaysay waa lasii wedi doonaa fasaxa Samarka 2021. Ayadoo barbarsocota iskuulka Samarka wuxuu bixinayaa Xafiiska Isdhexgalka Awstariya (ÖIF) sidoo kale 2021 mar labaad Koorso loogu talagalay Waalidka iyo cidda Xaqa Tarbiyada leh, kuwaasoo Caruurtoodu kaqaybgelayaan Iskuulka Samarka. Kooraska ka kooban sedexda saac ee Waalidiinta ee ÖIF waxuu gudbinayaan Aqoonta iyo Jihaynta Muuqaalka Waxbarashada ee Awstariya iyo Guusha Waxbarasho ee Ubadkaada.

Koorsooyinka Waalidiinta ee ÖIF waxay waxay dhici doonaan inta udhexeysa 17 May iyo 10 Sebtembar waxaana laga bixin doonaa Awstariya oo dhan. Koorsooyinka waxaa maamuli doona Tababarayaasha lahubiyay ee ÖIF. Haddii loo baahdana waxaa loo yeeraya Turjumaanada ÖIF. Fursadaan waa u bilaash dadkoo dhan.

### Koorsooyinka Waalidiinta waxaad ku qaadan doontaa Xog ku saabsan...

- Iskuulka Samarka ee 2021 (sida Mowduucyada, Ahdaafta, Fursadaha),
- Aasaaska sistamka iskuulka iyo Waxbarashada ee Awstariya,
- Xog dheeraad ah Waxbarashada- iyo Fursadaha Waxbarasho ee Dhalinyarada Fasalka sagaalaad kadib (sida leere/Xirfad iyo dugsigsare wada socda, Fikrad Xarumaha Latalinta ee Gobalka ka jira),
- Macnaha waajibnimada in Waalidku ama ama qofka Tarbiyada xaqa u leh inay lashaqeeyaan Hawsha waxbarasho ee Caruurtooda (sida Iskuulka qasabka ah, Shaqada fiidka waalidiinta,gaaridda Xiriir wax ku ool ah lala sameeyo Barbaariyaasha, Isticmaalka Barnaamijka Schoolfox),
- Caawimaad-iyo Fursada Kaalmo Dhaqaale ee Caruurta iyo Dhalinyarada (sida Hadii dhib kahaysta waxbarashada, udiyaarinta Bilowga iskuulka, ka kaalmeenta luqadda jarmalka iyo sidoo kale
- Fursadaha Barashada Luqadda Jarmalka ee Waalidiinda iyo kuwa Xaqa Tarbiyada leh.

### Ka qaybqaadashada

Si aad Koorsooyinka uga qaybgashid, fadlan toos ulaxiriir Maamulka iskuulka Caruurtaada. Ka faa`iidayso Fursadaan, inaad cunugaada sida ugu fiican Iskuulka uga caawisid!